


## Waa maxay Uumiga Aan la Rabin?

Kiimikooyinka ku daatay ama lagu qubay dhulka ayaa wasakhayn kara carrada iyo biyaha dhulka hoostiisa. Iskudhisyada orgaaniga ah ee aan degganayn (VOCs) waa khiimikooyin si sahlan ugu uumibaxa hawada. VOCs-ga ka yimaadda carrada ama biyaha dhulka hoostiisa oo wasakhaysan ayaa ku abuuri kara uumiyo kiimikaad dhulka hoostiisa. Haddii uumigani soo gaadho dhisme, wuxuu ka gali karaa dillaacyada seeska, qasabadaha agagaarkooda, iyo nidaamka bullaacadaha. VOCs ayaa markaa wasakhayn kara hawada gudaha. Nidaamkan - marka wasakhawgu ka yimaado hawada carrada ee uu yimaado hawada gudaha - ayaa loo yaqaan wasakhawga hawada gudaha.

VOCs-yada laga helo inta badan marka ay dhacaan uumiga aan la rabin Minnesota waa xaydh-tiraha warshadeed trichloroethylene (TCE), milaha nadiifinta qallalan tetrachlorethylene (perchloroethylene, PCE), iyo qaybaha batroolka. Tusaalayaal guryaha kuwaasi oo noqon kara ilaha VOCs waa shirkadaha warshadaha, kuwa nadiifka qallalan, iyo dukaamada birta.



## Maxay tahay ujeedada baaritaanka uumiga ah aan la rabin?

Dhismayaasha waxaa laga baaraa uumiga aan la rabin si loo go'aamiyo haddii ay jirto halis ah gelitaanka kiimikada uumiga ama suurogalnimada dhibaato caafimaad oo ay leedahay. Haddii ay jirto walwal xagga caafimaadka ah, uumiga wasakhaysan ayaa soo galay hawada gudaha isagoo ah heerar walwal leh dadkuna waxay u baahan yahay inay hawada neefsadaan iyadoo wasakhaysan. Halisaha caafimaad ee ka yimaad uumiga aan la rabin sida badan waa qaar hoose, laakiin waxa muhiim ah in tallaabooyin loo qaado yaraynta ama suulinta uumiga aan la rabin halkii ay suurogal tahay.

## Maxaa dhacaya haddii uumiga aan la rabin shakisan yahay inuu jiro?

Uumiga aan la rabin ayaa la baaraa iyadoo la qaadayo muunado bey'eed si looga raadiyo jiritaanka kiimikooyin iyo xaddiyo kiimikooyin ah. Haddii kiimikooyinka ay u dhaw yihiin dhismayaasha, waxaa lagama maarmaan noqon karta in laga qaado muunado uumiga carrada islaab-hoosaadka ama hawada gudaha. Muunadaha islaab-hoosaadka waxa loo qaadaa iyadoo la daloolinayo dalool yar oo seeska ah si loo qaado muunad uumiga carrada ee ka hooseeya dhismaha.

## Maxaa la sameeyaa si loo yareeyo uumiga aan la rabin oo loo hagaajiyo tayada hawada gudaha?

Haddii uumiga carrada dhismahaaga hoostiisa laga helo heerar muujinaya walwal, nidaam lagu yaraynayo (nidaamka sub-slab depressurization) ayaa loo baahan karaa si loogu laydhiyo uumiyaada hoosta seeska hawada dibadda. Kuwani waa nidaamyo isku mid ah oo loo isticmaalo in looga ilaaliyo radon in ay soo galsho dhismayaasha. Hababka kale, sida hagaajinta cadaadiska dhismaha ama xakamaynta HVAC, ayaa sidoo kale laga yaabaa inay wax-ku-ool u tahay xaaladaha qaarkood.

## **Biyaha aan cabbayo ma saamaysaa?**

Uumiga aan la rabin waxa inta badan la xidhiidha wasakhaynta biyaha dhaw ee dhulka hoostiisa ama ciidda. Biyaha cabitaanka ee degmadu waxay badanaa ka yimaadaan ceelal qoto dheer ama biyo dusha sare ah, waxaana si joogto ah looga baaraa wasakhaynta si loo hubiyo in ay buuxiso heerarka. Haddii aad u isticmaasho ceel gaar ah biyaha la cabbo oo dhismahaagana ku socoto baaritaanka uumiga aan la rabin, nala soo xiriir wixii macluumaad dheeraad ah.

## **Su'aalo? La xiriir Waaxda Caafimaadka ee Minnesota**

Cutubka Qiimaynta Goobta iyo La-talinta

Wac (651) 201-4897 ama limeyl u dir [health.hazard@state.mn.us](mailto:health.hazard@state.mn.us)

[www.health.state.mn.us/divs/eh/hazardous/topics/vaporintrusion.html](http://www.health.state.mn.us/divs/eh/hazardous/topics/vaporintrusion.html)